

# Munaasabadda **Valborg** 2020

## Uppsala

Inkastoo dabaaldega dhaqameed ee munaasabadda [Valborg] sannadkaan la mamnuucay, ayaa haddana waxaa dhici karto in dhallinyarada ay goob isugu soo uruuraan. Xaaladdaas waxaa dhici karto in da`yarku u markii ugu horeeysay u cabbo khamri ama isticmaalo maandooriye. Tan kale waxaa bilowday xilligii gu`ga waxaana ku xiga xilliga dugsiyada la xiri lahaa. Taasoo iyadana sababayso in dhallinyarada badidooda ay doonayaan in ay xafladeeyaan.

Sidaas awgeed, waxaa muhiim ah in waalid kasta uu wadahadal arrintaan ku saabsan ubadkiisa la yeesho, loogan dhigo halista dhacdoonkaan u leeyahay isaga iyo dadyoowga kale ba. Waxaa dhici karto in xilhaayaha xannaanadda/waalidka ay arrintaan walwal ku abuurto. Tan kale, kormeerideeda arrin sahlan ma aha, laakinse waalidku wuxuu heli karaa taageero.

Naga guddooma dhawr naseexooyin oo xiriir la leh munaasabadda [Valborg] iyo goorta dugsiyada la xirayo:

**Wadahadal ku saabsan dabaaldega la yeelo ubadkaaga** adigoo qodqod-badnaansho iyo dhego nuglaan u muujiyo. Iyadoo islamarkaas aad xad u yeelayso dhaqdhaqaaqiisa hana u soo ibin khamri.

**Xaji/badi xiriirka aad ubadkaaga la leedahay** maalintaas/habeenkaas .

**Waalidiinta kale la wada shaqeey** waxaana wadajir adeegsataan nidaam idin gaar ah.

*Naseexooyin iyo taageero kale; ka aqriso; <https://www.iq.se/tonarsparloren/>*

Haddii qofka wayn **u ka walwalsan yahay in ubadkiisa u cabbo khamri ama isticmaalo maandooriye**, wuxuu la xiriiri karaa [Ungdomscentrum] 018-727 15 50 ama [ungdomscentrum@ uppsala.se](mailto:ungdomscentrum@ uppsala.se)

### **Salaan wacan naga guddooma**

#### **Uppsala ungdomsjour**

Wadashaqaynta maamullada dugsiyada, Maamulka adeegga bulshada, ciidanka booliska & goobaha wakhtilummiska

#### **FAAHFAAHINTA XIRIIRKA**

**Facebook:** Uppsala Ungdomsjour

**Instagram:** UppsalaUngdomsjour

Taleefan: 072-593 63 98

E-mail:  [uppsalaungdomsjour@ uppsala.se](mailto: uppsalaungdomsjour@ uppsala.se)